# Xafiiska Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku socota xubnaha Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dalka dibadiisa ku nool (No. 22)**

Nayroobi, 8 February 2010

As-Salaama Alaikum

Saaxiibayaal,

1. Warbixintani wa tii joogtada ahayd ee aan ugu war bixinayey Jaaliyadaha Soomaaliyeed. Sidaa darteed, waxaan si gaar ah ugu faraxsanahay in aan idin la wadaago arrimmaha soo socda: Usbuucii la soo dhaafay, waxaan u safray Muqdishu, waxaana i wehliyey, Mr. Lamtane lamamra, oo ah Ergaygga u qaabilsan Ururka Midawga Afrika arrimmaha nabada iyo Amniga, iyo Danjire Boubacar Diarra, Ergaygga gaarka ah ee cusub ee Ururka Midawga Afrika u qaabilsan arrimmaha Soomaaliya. Waxaana hulas wadahadal kula soo yeelanay mas'uuliyiin. Isla usbuucii tegay, waxaan booqday Magaalad Doha, halkaas oo la igu sharfay in aan kulan la yeesho Amiir Sheikh Xamad Bib Khaliifa Al- thani.

2. Aniga oo ka mid ah Ergada Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay, waxaan ka qeybgalay shirkii 14aad ee Ururka Midawga Afrika. Waxayna aheyd markii ugu horesay ee aan arko ayada oo Gudoomiyaha Midowga Afrika, Jean Ping iyo madax badan ee dalalka Afrika oo doonaya in ay la yimaadaan talo soo jeedin la taaban karo, taasoo la doonaayo in lagu kaalmeeyo nabad ku soo dabaalista wadnakiina Soomaaliya. Waxaa dhiirigelin laheyd in aan arko madaxda Afrikaanka ah oo ay ka go'an tahay in aysan ka hadli Karin midnimada Afrika ayaga oo aan wax ka qaban arrinta Soomaaliya oo ka mid ah aasaasayaashii Ururka Midawga Afrika. Jaamacadd Carabta iyo Uruka Islaamka waxay taageersan yihiin mowqifkan, waxaana waqti dhaw la rajeynaynaa in uu dhaco kulan heer madax ah ay ka dhex-dhaca 3aad urur kaas oo lagu taageeraayo Soomaaliya. Shirkaana waxaan rejeynayaa in dhaco inta usan qabsoomin shirka kulan madaxeeda wadamada Carabta ee ka dhici doona Libya bisha sooscota.

3. Madaxda Afrikaanka, markii 1999 iyo kulan madaxeedkooda 2000, ay cambaareeyey in awooda wadanwalba xoog lagu qabsado, aya madaxda wadamada Afrikaan ah xiligaan si xoog leh u cambaareeyeen in xukuumad lagu bedelo si aan waafaqsaneyn dastuurka ay tahay arrin caqabad ku ah arrimmaha nabada. Arrintaani, waxay khuseysay madaxda la soo doorto oo doonaya in ay wax ka bedelaan dastuurada ka jira wadamadooda si awooda mudo dheer u heysataan. Kulan madaxeedku wuxuu isla gartay in sanada 2010-ka ay u aqoon-sadaan in uu ahaato (sannaddii Nabada iyo Aminga ee Afrika), waxayna cadeeyeen in ay u hawlgalayaan intii karaan-kooda ah si xal waara loogu helo dhibaatada Soomaaliya.

4. War wanaagsan. Ugu danbeyntii wadamo farabadan ayaa hadda u aqoonsan Soomaaliya in xiligaan ka gudbeyso xaladii aheyd dawlad guuldareesatay unna guureyso marxalad dawlad jilacsan. Kala saaristaani (labada heer) wuxuu u mooqan kara in uunsan aheyn mid iska deh ah laakinse farqiga u dhexeeya labad eray aya muhiim ah. Anaga, UNPOS-ahaan waxaan si joogto ah u qabna in falka ku dhisan wax cambaaraynnta aysan u fiicneyn gaaritaanka wax horumarka, sidaas darted, waxaan u muujiyey Golaha Amaanka ee Qaraamda Middobay in Soomaaliya ay tahay wadan jilacsan ee aysan ahayn wadan guuldareystay. Kuwa naagu racsaan fikraddani waxay garwaaqsan yahiin arrimmaha ka dhalan kara arrintani. Waxay ogganayaan baahida loo qabo in Somaaliya loo aqoonsado in ay tahay waddan caadi ah inkastoo dhibaatooyin waayweyn ay haystaan waddanka. Arrintaan waxa kale noo mujinaysaa muhimadda ay leedahay in la ixtiraamo Somaaliya laguna kaalmeeyo loogana gargaaro dhibatada ay hadda ku jirto loolana dhaqmo si waddan caadi ah. In Somaaliya loola dhaqmo wadan sida daraasad lagu sameynayo ma aha fal lagu dhameyn karo dhibatada ka jirta Somaaliya. Sidoo kale waa in muhiimadda la saarin oo kaliya wax ka qabashada arrimmaha nabadgelyada iyo amniga oo keliya ama gaargaar cunto oo la bixiyo lakiin waa in ay arrintaani barbar socotaa horumar dhaqaale qaasatan iyadoo la abuurayo fursado shaqo-abuuris ah, ganacsi iyo wixii la mid ah. Hadda waan in aan ka guurnaa arrinta guud ahaan la qabay ee ahayd in Somaaliya ay ahanayso waddan weligiis ku jiraayo dhibaato oo-na guuldareystay. Somaaliya waa inay ahaataa waddan dib isu dhisi kara ayadoo la siinayo kalmo ku haboon oo kaga imaneysa dibada. Waddankiina, sida ka jirta waddamada jilicsanba, waxaa ka jira baahi wayn ee dhinaca horumarinta iyo dib-u-dhiska. Arrinta marka loo bahan yahay waxay tahay habkii lagu soo jiidan lahaa maalgelinta iyo dib-u-dhiska waddanka uu u baahan yahay. Waxaan hubaa inta aan la gaarin bisha May 2010 inaan idiin sheegi doono war wanagsan oo ku saabsan arrinta dib-u-dhiska iyo horumariinta taasoo loo maraayo jaal cusub.

5. Aqoonsiga la aqoonsanayo in aan hadda ka guurayno xiligii dhowladdii guul daraysatay loona guurayo hab dowlad jilicsani waana talaabo na dhiirigelinaysa waqtigaan hadda la joogo maddama dowladduna ay ku talabsatay horumar la taaban karo: Waxaana ka mid ah howlaha ay ka qabtay dhinaca dekedda, ayraborka, Baarlamaanka, Masjidka Isbahaysiga, iyo Raadiyo Muqdisho. Waxaa arin lagu farxo ah iyadoo ay jiraan caqabaddo fara badan oo dowladda haysta ayaa hadana dib u hagaajin lagu sameeyey Raadiyo Muqdishu ayadoo taladana ay iska lahayeen ama gar waddenba ka ahayeen dad Somaaliyeed oo keliya waxaana maal geliyey oo taageray dad Somaali ah, ayaagoo kaalmo dibadded anan helin ama wax aan macno lahayn oo keliya helay. Xataa kuwa Somaalida ah ee aan tageersanayn dowladda waa in ay soo dhaweeyaan kaalmeyaana dib u haagaajinta Radiyohooda qaran. Waxaan rajeynayaa in waxti dhow u shaqeyn doono Telivision heer qaran ah, kasoo kaabi doona shaqooyinka ay qabanayaan tevisionada gaarka loo leeyahay.

6. Inkastoo horumar la sameeyey haddana waa in aan maanka ku haynaa caqabadaha waaweyn ee siyaaso iyo nabadgelyo xumo ee waddankiina haysta maanta. 14 kii Janaayo waxaan ku iri Golaha Ammaanka ee Qaramaada Midoobay sida tan: “ *waa in la fahmaa in xagjirayaasha mas’uulka ka ah degganaasha la’aanta iyo qaska ay ka mid yahiin ajaanib fara badan oo qasdigooda ku koobnayn inay dowladda ku af gembiyaan xoog keliya, balse , ay ka soo horjedaan in aan wax xukumad ahba la sameyn. Dadka Somaaliyeed waxay rabaan, sida ummadaha kale ee*

*dunida ay u doonayaan, in ay helaan nabadgelyo iyo xukumad badbaadisa ayaga isla markaasna u addegta"*. Waxaa la jooga waqtigii dadka Somaaliyeed ay ogaan lahayeen ruunta ka jirta waddankooda. Waxaa la jooga watigii dadka Somaliyeed gaar ahaan dadka jaaliyadaha dibada ku nool ee haysta amman iyo xuriyad buuxda inay u howl galaan si dii waddankooda dhibaatada iyo fowdada ka jirta looga saari lahaa. Maanta dagaalaka dhabta waa in uu ahadaa mid ku jihaysan soo celinta sharafta iyo xurnimada ummadda Somaaliyeed. Waxaan rabaa in aan dhamaantiin idiin sheego: 'in kharashka loo geelayo helista nabaadda uu ka yar yahay kan loo galaya dagaalka'.

7. Arrinta ku saabsan sharafta iyo dib u heshiisiinta, aniga, sida aan horeayba idiinkugu shegay waraaqahaygii hore, aniga waxaan diyaar u ahay, doonayaana in aan gacan ka geeysto kuwa doonaya in ay la hadlaan walaalahooda kale ee Somaaliyeed. Dhab ahaan tii sida ugu fiican waxa weeye in ay dadka Somaliyeed ay ayaga si toos ah u wada hadlaan uguna hadlaan waddankooda gudahiisa. Xafiiskeyguna waa uu taagerayaa wax Alle iyo Wixii dadaal ah eek u aadan arrintaas. Siyasadani waa in ay gacan ka geysataa habkii loo caadi yeen lahaa xaaladda dadka ay haysato dhibaatada sharci –kuwaas oo ku jira liiska Golaaha Ammanka ee Tirsigiisu yahay 1267 soona baxay (2000). Arrintani dhowr jeer ayaan soo jeediyey anigu haddana mar kale ayaan ku celinayaa oo aan xaqijinayaa in aan diyaar u ahay in aan kaalmeeyo kuwa ay khusayso arrinta ku tilmaaman Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramadda Middobay ama ay haysato dhibaatooyin kale ee siyaasadeed.

8. Nasiib daro, dhibaatada dadka barakacayaasha ah, qaxootiga, tahriibinta dadka, ku xadgudubka xuquqal insaanka iyo arrimo kaleto oo xad gudub ah ayaa iska sii socda. Sida aad ogsoon tihiinba noloshu waxay leedahay kor u kac iyo hoos u dac badan. Hadana waa in aan soconaa oo ay naga go'naataa in aan wax qabsanno. Dad badan oo jiray ayaa soo maray noolashaan adinka hortiin: ku safra aduunyada oo dhan ka dibna fiiriya waxa ay ku denbeeyeen kuwii diiday Runta, Suurada 3aad aayada 137.

9. Waxaan si guud u ogaaday in aad tihiin dad wax tar leh isla markaasna u soo kaban karo si dhaqso leh. Waxaa laga yabaa in aad kala shakisaan lakiin waxaan hubaa in aadan is necbeen . Shaki igaama jiro markay dadka Somaaliyeed isku tashtaan in ay xaalin karran wax kasta oo dhibaato ah oo ka hor yimaada. Waana markaas marka kaalmada kuwa anaga naga tirsan ee doonayaa in ay wax caawiyaan ay waxtarayso kaalmadooda. Habkii kaalmada dibadda la gu soo marinayay Shirkadii Price Water House Coopers – PWC howsheedu waxay u socotaa si lagu qanci karo. Arrinta la xirirta shakigii laga qabay soo dabiicistii lacagta shilin Somaaliga ahaa waxaan rabaa in aan caraabka ku adkeeyo in ay howl galkaasi usan ahayn mid tuhun keenikaro waxaane mahad leh kaalmada ay Sudan ka geysatay arrintaas. Aniga ayaa shaqsi ahaan la hadlay dhammaan dadkii ay khusaysay arrintaasi. Mar walba iska hubiya haddalada ku tiri kuteenka ah inta aydan go'aan gaarin. Ugu dambeytii waxaa surta gal ah inay Somaaliya waqti dhow ku biirto EAC, taasoo u fududeynaysa helitaanka dhaqaalo balaaran, ganacsi iyo awood dhaqaale oo ay helaan ganacsatada iyo habeenkiinaba. 2010 way in uu ahataa sannad wanagsan, waana Sanadii Nabadda.

Soo nabadd ahaada.

Walaalkiina Qaaliska ah
Ahmedou Ould-Abdallah